M05/1/A1SOM/SP1/SOM/TZ0/XX

22050283

**SOMALI A1 – STANDARD LEVEL – PAPER 1**
**SOMALI A1 – NIVEAU MOYEN – ÉPREUVE 1**
**SOMALÍ A1 – NIVEL MEDIO – PRUEBA 1**

Tuesday 3 May 2005 (morning)
Mardi 3 mai 2005 (matin)
Martes 3 de mayo de 2005 (mañana)

1 hour 30 minutes / 1 heure 30 minutes / 1 hora 30 minutos

---

INSTRUCTIONS TO CANDIDATES

- Do not open this examination paper until instructed to do so.
- Write a commentary on one passage only. It is not compulsory for you to respond directly to the guiding questions provided. However, you may use them if you wish.

INSTRUCTIONS DESTINÉES AUX CANDIDATS

- N'ouvrez pas cette épreuve avant d'y être autorisé(e).
- Rédigez un commentaire sur un seul des passages. Le commentaire ne doit pas nécessairement répondre aux questions d'orientation fournies. Vous pouvez toutefois les utiliser si vous le désirez.

INSTRUCCIONES PARA LOS ALUMNOS

- No abra esta prueba hasta que se lo autoricen.
- Escriba un comentario sobre un solo fragmento. No es obligatorio responder directamente a las preguntas que se ofrecen a modo de guía. Sin embargo, puede usarlas si lo desea.

*Faallo ka qor* ***mid ka mid ah*** *qoraallada soo socda:*

**1.** (a)

(Qaybtan ee sheekadii waxay ku saabsantahay gabadh Xamdi la yidhaahdo oo ka timi magaalada Muqdisho ka dib markuu dagaalkii 1991 bilowday.)

Dhowr bilood ka dib markii Muqdisho lagu kala dhaqaaqay ee aan dhowr iyo tobanka mushkiladood la kulmay intaana aan raadinayay dariiq aan ka galo dhul kaymeedka koonfurta Soomaaliya ayaan maalintii danbe aniga oo toban iyo dhowr maalmood jidka ku soo jiray oo intaa lug soo ahaa lana soo kulmay wixii rafaad la oran jiray, dariska la soo noqday bahalihii duur joogta ahaa intii sidayda u dhaqaaqi weyday ee ka soo hadhay, malaayiintii ugaadha dalxiiska ku habboonayd oo ay hadda inta ugu sokaysay xuduudka gobolka waqooyi bari ee dalka Kiinya ka sii gudbayso, waxaan ku soo baxay xarun dhufays adag oo ay leedahay koox ka mid ah kooxihii talada wadanka u loolamayay.

Waxayna ii soo gudbiyeen magaalada Jilib, ka dib markaan u sheegay inaan raadinayo saygaygii xalaasha ahaa. Waxaan u gudbay xarunta Sheekh Nuur oo ku taalla agagaarka degmada Jilib.

Dhowr maalmood ka dib waxaan u socdaalay degmadda Afmadow, nooligiina waxaa iga sii bixiyay hablo ganacsato ah.

Dhulka aan marayo oo dhan waxaan ku waday baafin, si aan u helo cid sheegta raq iyo ruux wuxuu ku sugan yahay, laakiin arrintaasi ma noqon mid Illaahay ii fududeeyay.

Afmadow oo ahayd xarun ganacsi xoolaad, oo malabka, subagga caanaha iyo hilibka ay yihiin waxa lagaga nool yahay ayaan xaafad walba kaga wareegay! Awal dadkayga ayaan iskaga dhex jiraye, hadda qofkaan la istaagaaba ‘Yaad tahay,’ ayuu ii hormarinayay. Wax debacsanaan ahna kama helaynin sheegashada magaca aan wato, waase adduun iyo xaalkii!

Dhowr maalmood ka dib waxaa siyaa Allaahu ah ku soo gaadhay magaalada Dhooblay, halkaas oo aad mooddo in baabuurta iyo dadka lagu raseeyay.

Waxaan ku qasbanaa inaan samaysto meel aan ku hoydo sida dadka kaleba yeelo, waayo noloshu waxaad mooddaa inay isku dhowdahay intaan baadiyaha oo tuulada u dhow aaday ayaan soo gurtay caws iyo oodo si aan hoy uga dhigto.

Xilligii aan diyaariyay meeshii aan ku hoyan lahaa ayaan u soo jeestay nolol maalmeedkii, kayn xaaboley ah oo aan shaley arkay markaan duurka wareegayay ayaan xaabo ka soo uruursaday, markii aan suuqa keenay, waxaa layga siistay lacag aanan waayadan gacanta saarin, maalinba maalinta ka danbaysa ayaan ka soo kordhinayay si ay lacagtii iigu siyaaddo.

*Waddadii Walbahaarka*, Xuseen Sheekh Biixi Addis Ababa, 1994, pp. 42-44

– Ka fiirso siduu qoraagu u muujiyay xaaladda Xamdi ay taagantahay.

– Ka faallood codka Xamdi iyo sida uu qoraagu codkeeda ugu isticmaalay qaybtan qoraal ah.

– Waa maxay dareenka qaybtani kugu kicinayso, sidee bayna kuugu kicinaysaa?

**1.** (b)

Dhirta xididka hoosaa
Dhulka loogu beeree
Way dhici lahaayeen
Dhismahooda weeyee
Kii dhab ah jacaylkuna
Halkii kama dhaqaaqoo
Dhidib baa u aasane
Sida dhumucda weeyaan
Jirridda iyo dhuuxa e
Dhererkiyo laxaadkana
Waa laysku dhaabee
Kii dhab ah jacaylkuna
Lama kala dhantaaloo
Lafuhuu dhameeyaa
Sida dhudaha weeyaan
Isu dheelli tiraanoo
Midba dhan u baxaysee
Dhinaca isa saaree
Kii dhab ah jacaylkuna
Waa dhaqan wadaagiyo
Isu dhalasho daacad ah
Sida dhalanka weeyaan
Dheehaa caleentuye
Ubax wada dhalaaliyo
Dhimbiishaa hadhaysee
Kii dhab ah jacaylkuna
Waa dhool hillaaciyo
Dhibic roob ku haysee
Waa sida dhillowyahan
Intuu laan iskaga dhegey
Dhexda loogu marayoo
Dhakhso uga baxaayee
Kol hadduu dhab naga yahay
Kala dhuuman maynoo
Waagaa dharaar noqon

(Heestan waxa tiriyay Xuseen Aw Faarax, 1964, waxana lagu daabacay *Heellooy Heelleellooy: The Development of the genre Heello in Modern Somali Poetry*, qoraha: John W. Johnson, Bloomington, 1974, pp 174-175)

– Gabayaagu muxuu ka yidhi jacaylka dhabta ah?

– Gabayaagu heestan wuxuu ku isticmaalay erayada iyo humaagyada la xidhiidha deegaanka iyo dhirta. Sidee buu isticmaalkani xoojiyaa macnaha heestan?

– Muxuu yahay dareenka heestani kugu kicinayso oo sidee bay kuu taabatay farriinteedu?